

## XUSUUS-QORID

**KU:** Guddiga Dugsiga Boston

**KA:** Jill Carter, Caawiyaha Kormeeraha guud, Caafimaadka & Fiyobida, DWC Madax-ku xigeenka Jenifer Lo, MD, Agaasimaha Caafimaadka, BPHC, DWC Madax-ku xigeenka

**CC:** Kormeeraha guud Brenda Cassellius  
Madaxa Shaqaalaha Mary Dillman  
Lataliye Sare Megan Costello

**TAARIIKHDA:** Arbacada, Agoosto 4, 2021

**CODSI:** Nidaamka Fayo-qabka Degmada SY19-20 Warbixinta Sannadlaha

Golaha Fayo-qabka Degmada (DWC) waxaa looga baahan yahay inay sannad walba qiimeeyaan u hoggaansanaanta Nidaamka Fayo-qabka Degmada ee BPS, iyagoo u beddelaya qiimeyn sanadle ah oo tayo iyo tiroba leh. Warbixinta tirada ku lifaaqan ayaa ku jirta:

- Asalka, ujeedada, iyo qaababka warbixinta;
- Heerarka degmo iyo dugsi si loo qiimeeyo hirgelinta mid kasta oo ka mid ah siddeed meelood ee nidaamka fayoaqabka iyo shuruudaha golayaasha caafimaadka degmada iyo iskuulka ee sanad dugsiyeedka 2019-2020;
- Caafimaadka ardayga iyo cabirada habdhaqanka caafimaadka laga soo qaaday sahanka 2019 ee Sahanka Habdhaqanka Halista Dhalinta (YRBS), Macluumaadka kalkaaliyaha caafimaad ee SNAP, iyo Sahanka Cimilada ee 2020 Dugsiga;
- Dood ku saabsan horumarka hirgelinta nidaamka iyo carqaladaha caafimaadka ee muhiimka u ah guusha tacliinta (sida dalbada, caafimaadka galmada, xiiqda, iyo dabeecadda iyo caafimaadka maskaxda); iyo
- Talooyinka lagu ilaalinayo laguna hagaajinayo hirgelinta Nidaamka Fayoaqabka BPS.

Sanad dugsiyeed aan la kulanay dhibaato caafimaad oo caalami ah oo saameyn weyn ku yeelatay bulshadayada maxalliga ah, waxaa muhiim ah inaan qaadanno waqti si aan u baarno sida aan u cabbirnay ballanqaadkeenna xagga siyaasadaha iyo dhaqamada fayoaqabka, sida aan ula qabsannay caqabadaha safmarka COVID-19, iyo sida aan u balaarin doonno wixii ka shaqeeyey si aan uga caawinno dugsiyadeena inay soo laabtaan, soo kabsadaan, iyo inay dib u sawiraan qaab wanaagsan oo horay loogu socdo. Waaxyada BPS waxay ku guuleysteen wax qabad ilaa maanta dhammaan qaybaha nidaamka, dugsiyaduna waxay ka shaqeeyeen golayaashooda fayoaqabka si ay uga dhigaan in nidaamka degmadu ay ku noolaato dhismayaasha dugsiyadooda. Waxaa jiray maalgelin lagu hagaajinayo kaabayaasha dhaqaalaha iyo kordhinta shaqaalaha si ay u bixiyaan adeegyo taageero ah; hadda waa waqtigii degmadu ay maalgashan lahayd waxbarista carruurta oo dhan. Waa inaan horumarino gaarsiinta degmadeena heerarka la jaanqaaday, xirfadaha ku saleysan waxbarashada caafimaadka iyo kordhinta gaarsiinta barashada shucuurta-bulsha iyada oo loo marayo waxbarashada caafimaadka, waxbarashada jirdhiska, farshaxanka, iyo ku xirnaanta meelaha kale ee tacliinta. Warbixintani waxay muujineysaa sida caafimaadka ardayda BPS iyo dugsiyadu u dhaqaaajiyaan shaqada waaxaha iyo xafiisyada kala duwan si ay isugu xirmaan dhamaan qeybaha kala duwan ee nidaamka si taageero loogu fidiyo iskuulada isla markaana toos loogu taageero ardayda. Waa inaan hubinno inay degmadu sii waddo inay wax ka qabato caqabadaha caafimaadka aan aqoonta ahayn ee hortaagan barashada iyadoo loo marayo sinnaan ku saleysan Dhammaan Iskuulka, Bulshada oo Dhan, Dhammaan Gaarida Carruurta

Sida uu qabo sharciga federaalka iyo kan gobolka, warbixintan sanadlaha ah waa in loo soo bandhigaa Kormeeraha guud iyo Guddiga Dugsiyada BPS, loona gudbiyaa Waaxda Massachusetts ee Dugsiyada Hoose iyo Sare (DESE), isla markaana loo soo bandhigaa dadweynaha. Warbixinta waxaa loo diray DESE Dayrta 2021 iyadoo qayb ka ah Dib u eegista Maamulka Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada. Warbixinta waxaa lala wadaagayaa dadweynaha websaydhka BPS iyo Kulamada Golaha Fayo-qabka ee Degmooyinka iyo golayaasha waalidiinta degmada.